Xukunka Maxkamadda Sare U.S. Ee Xayiraadda Muslimka 3.0
Maxay Tahay inaad Ogaato

Maanta Maxkamadda Sare U.S. waxay bixisay 5-4 go'aan lagu raacayo Awoodda Xanibaadda Muslimka ee Trump. Hadda in ka badan awal, waa muhiim inaad ogaato xuquuqdaada. Ilaa Disembar 4, 2017, Xanibaadda Muslimka waxay si buuxda u qabanaysaa **xoogaa dad ka soo jeeda: Iiraan, Liibiya, Waqooyiga Kuuriya, Soomaaliya, Suuriya, Venezuela, iyo Yaman. Dhamaantood waxaa soo wajahaya caqabad wayn codsiyadooda ku saabsan fiisooyinka in ay la midoobaan qoyska, waxbarashada U.S., helidda daawo caafimaad oo degdag ah, ama in loo tago dalxiis.**

Warqaddaan waxaan ku koobaynaa **xaaladda taagan ee Xanibaadda Muslimka**, taasoo saameyn ku yeelanaysa, iyo waliba **xogta ku saabsan waxa loo yaqaano geedi-socdka ka dhaafidda.** Fadlan oggaw in xogtan ay u janjeerto inay is badasho ayadoo ku salaysan caqabadaha hortaagan ee sharciga kala duwan. Waan kugu soo wargalin doonnaa haddii wax isbadallo ah dhacaan.

Wakhtiga

Maxkamadda Sare waxay ogolaatay Xanibaadda Muslimka 3.0 inay dhaqan gasho Disembar 4, 2017. Markay ahayd Juun 26,
2018 Maxkamadda Sare waxay bixisay go'aanka ogolaanaya Xanibaadda Muslimka inuu sii jiro.

Yuu Saameyn Ku Yeelan?

Xogaa muwaadiniin ah todobo waddan - **Iiraan, Liibiya, Waqooyiga Kuuriya, Soomaaliya, Siiriya, Venezuela, iyo Yaman.**

Xanibaadda Muslimka 3.0 wuxuu kali ah oo qabanayaa shakhsiyaadka kuwaas oo ah 1) mid jooga meel ka baxsan U.S. Wakhtiga uu dhaqangalay.
2) kaasoon haysan fiiso wakhtigaa, iyo 3) kaasoon la siinin dhaafidda (hoos lagu sheegay).

Xanibaadda Muslimka 3.0 **ma** qabanayso:

- Dadka si sharci ah u dagan U.S. (dadka haysta giriin kaarka);
- Dadka la ogolaaday ama loo fasaxay U.S. Wakhtigii dhaqangalka sharciga cusub Xanibaadda Muslimka ama ka dib:
- Dadka haysta dukumiinti aan ahayn fiiso oo u ogolaanaya inay u socdaalaan U.S., haddii dukumiintigu ku taariikhaysanyahay wakhtiga dhaqangalka sharciga cusub Xanibaadda Muslimka ama ka dib;
- Dadka labada dhalasho leh ku socdaalaya baasaboor waddan aan la xanibin;
- Dad ay U.S. siisay magangalyo;
- Qaxooti horey loogu ogolaaday U.S.; ama
- Skahsiyaad la siiyay ka qaadidda, ka cafinta hore, ama difaacidda sida uu qabo Heshiiska ka soo horjeeda Jirdilka.

Si ka duwan go'aamadii hore, go'aankan **UMA** ogolaanayo ka reebidda "Xiriirada Cadaymaha Qoys" (taasi waa qoys aad isugu xiran sida waalid, xaas, ilmo, walaasha, walaalka, qof kuu alkuman (finace), iwm.)

Warkii Ugu Danbeeyay: Juun 26, 2018

Faafaahinta Waddamada uu Saameeyay

- **Iiraan**
  - Dhamaan fiisooyinka daganaanshaha (immigrant) iyo kuwa aan daganaansho ahayn (nonimmigrant) waxaa laga joojiyay dadka Iiraan u dhashay marka laga reebo fiisooyinkaan F, J, ama M.
  - Kuwa haysta fiisooyinka F, J, ama M waxaa aad suurtogal u ah inay la soo gudboonaato baaris dheer.
- **Liibiya**
  - Dhamaan fiisooyinka daganaanshaha (immigrants) iyo kuwa aan daganaanshaha ahayn (nonimmigrant), oy ka mid yihiin fiisooyinka ganacsiga (B-1), dalxiiska (B-2), ganacsiga/dalxiiska (B-1/B-2) waxaa laga joojiyay dadka Liibiyaanka ah.
- **Soomaaliya**
  - Dhamaan fiisooyinka daganaanshaha (immigrant) waxaa laga joojiyay dadka Soomaalida.
  - Fiisooyinka aan daganaanshaha ahayn (non-immigrant) waa la ogolyahay, waxayna marayaan baaritaan dheer.
- **Suuriya**
  - Dhamaan fiisooyinka daganaanshaha (immigrant) iyo kuwa aan daganaanshaha ahayn (nonimmigrant) ee dadka Suuriyaanka waa la joojiyay.
- **Yaman**
  - Dhamaan fiisooyinka daganaanshaha (immigrants) iyo kuwa aan daganaanshaha ahayn (nonimmigrant), oy ka mid yihiin fiisooyinka ganacsiga (B-1), dalxiiska (B-2), ganacsiga/dalxiiska (B-1/B-2) waxaa laga joojiyay dadka Yamanida ah.
- **Waqooyiga Kuuriya**
  - Dhamaan fiisooyinka daganaanshaha (immigrant) iyo kuwa aan daganaanshaha ahayn (nonimmigrant) waxaa laga joojiyay dadka Waqooyiga Kuuriya
- **Venezuela**
  - Fiiso siinta madaxda hay'adaha dawladda ee Venezuela waxaa la soo gudboonaan baarid iyo nidaamyda indho-indhaynta iyo xubnaha qoysaskooda, sida fiisooyinka aan daganaanshaha ahayn (nonimmigrants) ee ganacsiga (B-1), dalxiiska (B-2), iyo ganacsiga/dalxiiska (B-1/B-2), waa la joojiyay. Waxaa intaa dheer, dadka Venezuela kuwaas oo haysta fiiso waxaa la gudboonaan baaris dheer.
  - Dadka Venezuelans ku socdaalaya fiisooyinka diblamaasiga ma saamaynayo xukunkan.

Dadka Raadinaya ka Dhaafidda Xanibaadda Muslimka 3.0

"Dhaafidda" waa ogolaansho in la siiyo fiisada U.S., xitaa haddii Xanibaadda Muslimka dhahayo uma qalantid inaad hesho mid. Xanibaadda Muslimka 3.0 wuxuu qorayaa in shakhsiyaadka la xanibay codsan karaan ka dhaafidda in la codsado dhaafid u ogolaanaysa in fiisaha la siiyo mar allaale marka ay muujin karaan in:

1) Diididda gelitaanka ay ku keeni codsadaha fiisaha dhibaato adag;

2) Gelitaanka U.S. Ayna ku keenayn waxyeello amaanka qaranka ama amaanka dadwaynaha ee U.S; iyo

3) Gelitaanku noqonayo danaha qaranka ee U.S.

Sharcigu wuxuu qeexaa in sargaalka qunsulka ama Madaxda Canshuuraadka iyo Difaaca Xudduudda awood u leeyihiin inay bixiyaan ka dhaafidda ayadoo ku salaysan kiis kiis. Wuxuu sharcigu sidoo kale qorayaa tusaalayaal dhawr ah meesha ka dhaafidda la siin karo (sida baahida daryeel caafimaad oo degdeg ah, isku geynta xubnaha qoyska ee U.S. Xiriirada ganacsi iwm..

Nasiib darroo hanaanka ka dhaafidda aad uma cadda waxaana loo dabakhi si aan isku mid ahayn. Dawladdu waxay bixisay tilmaan raac aad u yar oo ku saabsan hannaanka ka dhaafidda. Waa kuwanaa isbaddallada aan aragnay:

- **Ma** jiraan hannaan rasmi ah in la codsado ka dhaafidda. Ma jiro wax foom laga heli karo onlaynka in la buuxiyo. Dukumiintiyo kasta oo loo gudbiyo safaaradda oo qeexaya sababta aad ugu qalanto ka dhaafidda waxaa laga yaabaa in la aqbalo ama aan la aqbalin.
- Safaarado badan waxay ku wargalinayeen shakhsiyaad labo mid uun:
  - (1) Safaaraddu ay diidayso ka dhaafidda dacwaddooda, ayagoo sheegaya in fiisaha lagu "Diiday sharciga 212(f)":

▪ Markaan, ma jiro hannaan racfaan ah go'aanka. Shakhsiyaad badan waxay soo gudbin karaan codsiyada ka dhaafidda, hase yeeshee, ma cadda haddii la aqbalayo.

  - (2) Safaaraddu waxay u tixgalinaysaa dacwaddooda ka dhaafidda:

▪ Markaan, safaaraddu waxay *karaan ama ayna karin* inay ku waydiiso wax ku saabsan shuruuda sare ee waraysiga; safaaraddu waxay *kari ama ayna karin* aqbalaadda warqad qoraal ah oo qeexaysa sababta aadan u waafaqin shuruudda sare waraysigaaga ama haddii aad isku dayayso inaad iimayl/boosto u dirto ayada; safaaraddu waxay *kari ama ayna karin* inay u gudbiyaan dacwaddaada Washington D.C.

Haddii aad leedahay waraysi soo socda ka hor safaaradda, fadlan raadi talo sharci oo ku saabsan hannaanka ka dhaafidda.

Laga bilaabo May 15, 2018, 655 ka dhaafid ayaa la cadeeyay in la bixiyay illaa intii Xanibaaddu dhaqangashay. Markaan aad uma cadda sida dacwadahaan loo qaabayn doono iyo tallaabada xigta waxa ay tahay illaa dawladdu ka bixiso tilmaamo badan. Xogta ku saabsan ka dhaafidda waxay isku badali kartaa si dhakhso ah, sidaa darteed raadi caawin dhanka sharciga ah (ayadoo laga taxadarayo khiyaamooyinka) oo fadlan dib u hubi marar badan.

Sidee loo Helaa Caawin Sharci

Labadanada hay'adoodba waxay bixiyaan xog iyo adeegyo sharci oo lacag la'aan ah. Waxaad la xiriiri kartaa hay'adahanaga haddii:

- Adiga ama qof aad taqaano ay saamaysay Xanibaadda Muslimka ood jeclaan lahayd talo sharci oo lacag la'aan ah ama caawin;
- Bulshadaada ay jeclaan lahaayeen in la codsad warbixinta "Oggaw Xuquuqdaada".

CAIR SF Bay Area:

408.986.9874 ama
online.

Advancing Justice-Asian Law Caucus:

415.848.7711 ama online.

(Carabi, Faarsi, Soomaali, iyo Urdu kuwo ku hadla ayaa la heli karaa.)

Warkii Ugu Danbeeyay: Juun 26, 2018